# *Kalinimo, Danyar iyo Jahwareer*

# *Haweenka u halgamaya in ay Caddaalad ka helaan Maxkamadaha Somaliland*

**8 March 2021**

8 March, Maallinta Haweenka Adduunka, waa xusuusin waxa bulsho kasta ay tahay inay sameyso, si wada jir ah, si ay uga tarjumaan caqabadaha haweenka ka celinaya inay si buuxda ugu raaxeystaan xuquuqda iyo fursadaha uu sharcigu siiyey iyo bayaannada siyaasadeed. Meel kasta oo ay adduunka kaga nool yihiin, isbaarooyinka haweenka iyo gabdhaha ay la kulmaan waa isku mid, heerarkoodu haba kala duwanaadaane - awood la'aan dhaqaale iyo mid siyaasadeed, caqabado xagga sharciga ah, dhinacyada waxbarashada oo aan loo sinneyn iyo takoorka / eexda oo ku saleysan dhaqanka iyo in la ixtiraamo hanaanka ay diinto soo jeedisay. Dhamaan saamaynahan isbiirsaday waxay burburiyaan, ama sida ugu weyn, u wiiqaan kalsoonida haweenka, taas oo iyaduna kadhigaysa mid aad ugu adkaata iyaga inay wajahaan waxa kaliya ee ay u arkaan caqabado aan laga gudbi karin.

Waxa jira Somaliland kumanaan dumar ah oo ay iskugu darsantay aqoon daro iyo faqri, Waxa ay tagaan maxkamadda iyagoo ka cabanaya dhibaatooyin qoys, raadinayana furniin, xanaanaynta caruurta iyo in ay dalbadaan nafaqadii caruurtooda, balse waxay la kulmaan niyad-jab iyo geeddi socod aad u qaaliya. Haweenkan badankoodu waxay aamineen maxkamadaha oo ah nidaamka caddaaladda tooska ah, kadib markii faragalinta qoysaskooda iyo odayaasha nidaamka dhaqanku ay hoos u dhigtay iyaga. Laakiin ka hor inta aysan talaabo kale qaadin ama aysan gaarin go'aan, maxkamaduhu waxay dib ugu celiyaan arintooda isla odayaashii iyo nidaamkii dhaqan ee horeyba ugu fashilmay arintooda, iyagoo raadinaya xal tanaasul ah. Marka ay odayaashu gaadhi waayaan xal dhamaystiran, dacwadda waxay dib ugu soo celiyaan maxkamadda.

Laga soo bilaabo shaqadii iskugu jirtay cilmi baadhista iyo taakulaynta sharciga ee toddobadii sano ee la soo dhaafay, *Horizon* waxay ogaatay in haweenka Somaliland ay si weyn uga doorbidaan maxkamadaha nidaamka dhaqanka,[1] Sababtuna ay tahay in maxkamaduhu yihiin goob ay kaga hadli karaan waxa ay ka cabanayaan iyagoo afkooda

---

[1] Eeg daraasada warbixinta ay samaysay Horizon Institute, 31 July 2017, *Baseline Study Report.*

6th Floor Omar Hashi Building, Hargeisa, Somaliland | +252 523 603 +252 (0) 633 751 063
P.O. Box 691-00621 Nairobi, Kenya | +254 (0) 20 4180 222 +254 (0) 713 773 420
www.thehorizoninstitute.org | info@thehorizoninstitute.org

ku hadlaya. Si kastaba ha noqotee, xaqiiqda qallafsan, waa inaad ka hor hadasho maxkamadda oo ah meel ay gabi ahaanba rag xukumaan, markaad tahay haweeney aan haysan wax dhaqaale ah, aan aqoon lahayn, aan cilmi u lahayn sida ay maxkamaduhu u shaqeeyaan iyo islamarkaana aan helin caawimaad sharci, waa hawl culus . Way fududahay inaad dareento guuldaro iyo in aad isdhiibtaba, waana sida ay haween badani sameeyaan kadib marka ay dhowr jeer kasoo muuqdaan maxkamadda.

Dhibaatooyinka haweenka saboolka ah ay la kulmaan marka ay caawimaad ka raadsadaan maxkamadaha waa kuwo badan oo kala duwan. Marka aynu ku salayno shaqada *Horizon,* cabashooyinka aasaasiga ah waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Badanaa ma awoodaan inay iska bixiyaan lacagaha yar-yar, sida 30,000 Somaliland shillings ama $3.5. Qoraalka arjiga dacwad furashada oo kharashkiisu yahay 57,000 shillings/$6.5, inay iska bixiso cashuurta dawladda si loogu furo dacwada iyo 40,000 shillings /$4.5 oo ah kharashka lagu gaadhsiinayo yeedhmada ninkeeda, taasi oo ka badan karta hal mar.
- Iyagu kama war-qabaan in ay Guddoomiyaha Maxkamadda ka codsan karaan inuu ka dhaafo kharashka cashuurta dawladda ee dacwad furashada oo ah 57,000 Somaliland shillings.
- Haddii aanay iyagu nasiib u helin in ay la kulmaan urur ka caawiya xagga sharciga, oo ka jira keliya Hargeysa, Boorama iyo Burco oo dhawaan laga furay, haweenku ma haystaan wax metelaad sharci ah maadaama aysan dabooli karin kharashka ku baxa qabsashada qareen. Xitaa magaalooyinka Hargeysa, Boorama iyo Burco, ururada ka caawiya xagga sharciga waxay gebi ahaanba ku tiirsan yihiin deeq-bixiyeyaasha, markii aanu mashruuc jirina, adeegyadoodu sidoo kale way istaagaan.
- Rag badan oo garsoorayaal ah ayaan u qaadan cabashooyinka dumarka ee ku saabsan khilaafaadka qoyska si dhab ah, xitaa haddii ay la kulmaan dhibaatooyin jidheed iyo dhibaatooyin hanjabaado dheeraad ah. Markii ay fiiro gaar ah u yeeshaan nuxurka kiiska, tixgalin la’aanta cadaynteedu waxay ka dhigaysaa gabadhii inay ku adkaato in ay si qoto dheer u faahfaahiso cabashadeeda iyo inay ku qanciso maxkamadda in ay haysato asbaab sharci oo u baahan in wax laga qabto.
- Qaraabada labada dhinac waxay maxkamada horteeda ka balan-qaadaan in ay aad u eegayaan, darsayaan cabashada gabadha, laakiin waxbadan kama qabtaan, intooda badana waxba kama qabtaanba.
- Xaqiiqatan in dhamaan garsoorayaashu yihiin rag waxay saamaynaysaa rabitaankii gabadha, gaar ahaana bulshada xidh-xidhan ee markooda horeba su’aalaha galiyey in gabadhu timaado maxkamad sharci, si ay uga hadasho arrimaha gaarka ah ee qoyska. Marka sidaas la yeelo waxa kale oo ay sii kala fogeyneysaa qaraabadii labada dhinac, kuwaasi oo fure u ah in go’aan laga gaadho kiiskooda. Dumar badan ayaa u arka “Ceeb iyo Sharaf dhac” in ay hadlaan marka ay horjoogaan garsoorayaal rag ahi. Dacwadaha waxa la dhegaystaa iyagoo ay joogaan dad kale oo dacwadahooga sugaya, waxaanay arintani ka dhigaysaa gabadhii inay ka cago-jiido in ay si faahfaahsan u soo bandhigto cabashadeedii. Xaqiiqada ah in qaar ka mida garsoorayaashu ay toos

ugu yidhaahdaan gabadhu waa in aanay keenin murannada qoyska iyo waxyaabaha kale ee ka dhacaya guryahoodaba maxkamadaha, kuma dhiirri galinayso gabdhaha waxaanay u arkayaan maxkamadaha inay dhinac yihiin.

- Waxa suuragal ah in dacwaduhu qaataan waqti aad u dheer, iyadoo ay si joogto ah isaga daba noqonayaan una dhexeeyaan maxkamadda iyo odayaasha, iyo sugidda inta yeedhmada la gaadhsiinayo iyo inta laga soo jawaab celinayo. Sugitaankaas dheer, si la fahmi karo ayuu u jahawareeriyaa dumarka oo qaar badan oo ka mid ah ayaaba ka quusta nidaamka maxkamadaha oo dhan.
- In loo baddelo khibradda dumarku u leeyihiin nidaamka caddaaladda ee rasmiga ah dhinac togan ee wanaagsan waa masuuliyad saaran ragga iyo dumarka reer Somaliland labadaba, iyada oo ay weheliyaan tabaruucaad wax ku ool ah oo laga helayo hay’adaha deeq bixiyayaasha, ururada caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah ee ka shaqeeya waaxda caddaaladda. Waa wax aan caqli gal ahayn, oo aan waaqic ahayn, in laga fisho in haweenay kastaa u adkaysto awood darrada iyo eexda aynu kor xusnay inay noqdaan mishiinka dhaqaajinaya inuu isbadel yimaado. Isbeddelku wuxuu imaan karaa, si kastaba ha noqotee, marka diiradda si toos ah loo saaro tallaabooyinka wax ku oolka ah ee keeni kara horumar deg deg ah oo la taaban karo kuwaasi oo u beddeli kara maxkamadaha hay'ado soo dhaweynaya oo taageeraya xuquuqaha haweenka ee ka cabashada tacadiyada, caddaalad darrada iyo takoorka halbawlaha u ah khilaafaadyada qoysas badan.

Imaanshaha kaligeed maxkamad aanay wax xog ah ka hayn iyadoo wareersan, islamarkaana aan wax fikrad ah ka haysan hanaanka la xidhiidha maxkamadaha, ayaa waxa ay jahawareerin kartaa qofka ugu adag oo ay waliba dhaawac u gaysanaysaa kaalsoonidiisa. Waxa jira dhawr tallaabo oo mihiim ah oo sare u qaadi kara niyadda dumarka maxkamadda u yimaadda kiisas qoys, waxaana ka mid ah:

- Magacaabista haween garsooreyaal ah waxa ay isbaddel weyn ku samaynaysaa rabitaanka haweenka in ay arrimahooda ku soo bandhigtaan nidaamka maxkamadda ee rasmiga ah, gaar ahaan in ay ka hadlaan mawduucyada xasaasiga ah*:*
- Maxkamaduhu waa inay u qoondeeyaan xafiis, ay ka shaqeeyaan haween, oo ay ku wareystaan haweenka si xor ahna ugu hadli karaan iyo in garsoorayaashu ay soo saaraan tallooyin iyo go'aanno xog-ogaal ah.
- Marka qodobkan hore aanu suuragal ahayn, garsoorayaasha waa inay haweenka siiyaan fursad ah in ay u waraystaan gaar ahaan, iyadoo ay la joogto gabadh ka shaqeysa maxkamadda, lana siiyo waqti ku filan oo ay ku sharraxdo xaaladdeeda;
- Ururada garyaqaannada, kooxaha caawiyayaasha sharciga ah iyo ururada xuquuqul iinsaankuba waxay u baahan yihiin inay si wadajir ah uga shaqeeyaan sidii kor loogu qaadi lahaa metalaadda sharci ee bilaashka ah ee ay siinayaan haweenka aan awoodin inay qareen qabsadaan.
- Dawladdu waa in ay aasaastaa xarrumaha la talinta qoyska oo ay ka shaqeeyaan rag iyo dumarba si ay u siiyaan qoysaska fursad ay kaga wada hadlaan dhibaatoyinkooda ka hor intaanay maxkamadi xal ka gaadhin.

***Hay'adda Horizon waa Urur Maxalli ah oo ka hawlgala Somaliland kana shaqeeya sidii loo horumarin lahaa sarreynta sharciga iyo xuquuqal insaanka. Warbixinaha iyo daraasadaha aanu soo saarnaa waxa ay daah-furaan arrimaha taaggan ee lagu ogaaday shaqada aanu qabano. Waxa ay bixiyaan xog iyo gorfeyn loogu tallo galay in ay cariso doodda ka dhaxaysa daneeyeyaasha, dadweynaha iyo deeq-bixiyaasha iyo in ay kor u qaado siyaasadaha xukuumadda iyada oo lagu salaynayo qadarinta xuquuqal insaanka, sarraynta sharciga iyo dhiirigelinta isku filaanshaha.***

***Si aad wax badan uga ogaatid hawsha aanu qabano, fadlan booqo degalka internet-ka aanu ku leenahay ee www.thehorizoninstitute.org nagala socda Twitter @Horizon_SL iyo Facebook @HorizonInstituteSomaliland.***

***Wixii macluumaad dheeraad ah ee aad u baahan tahay, waxa aad nagala soo xidhiidhi kataa email-ka info@thehorizoninstitute.org iyo telefoonada +252 523603 / 0634717933***